

Xeerka Maamulka, ee 30 Jannaayo 1960, lamba. 6 diw.

Heshiiska ka dhexeeya Soomaaliya iyo Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, ee xagga maamulidda Adeegga Keydka Kansiga.

MAAMULAHA

Markuu arkay sharciga Jamhuuriyadda Talyaaniga, ee 4 Noofember 1951, lamba. 1301, oo meelmarinaya, awood fulinna siinaya Mucaahada Wasaayada Dhulka Soomaaliya;

Markuu arkay sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1, oo lagu dhisay Xukuumadda Soomaaliya;

Markuu arkay XM (Xeerka Maamul), ee 31 Maarso 1959, lamba. 580025, oo siinaaya Sanduuqa Wareegga Lacaga, ee Soomaaliya, waajibaadka (xilalka) ay hore u lahayd Laanta Muqdisho, ee Bangiga Itaalya;

Markuu arkay heshiiska oo taariikhdiisu marka ay ahayd 1da Setembere 1959, ee ka dhexeeya Xukuumadda Soomaaliya iyo Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, xagga maamulidda Adeegyada Keydka Kansiga, ee Xukuumadda;

Markuu Aqoonsaday fursadda ah in la ansixiyo lana siinayaa awood fulin heshiiska qudhiisa;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Asaga oo ka duulaya soo-jeedinta Wasiirka Maaliyadda;

WUXUU XEERINAYAA:

Waxaa la ansiyey, lana siiyey awood fulin, laga bilaabo 1da Jannaayo 1960, heshiiska ka dhexeeya Xukuumadda Soomaaliya iyo Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, xagga maamulidda Adeegyada Keydka kansiga, ee Xukuumadda.

Muqdisho, 30ka Jannaayo 1960.

Maamulaha

Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Wasiirka Maaliyadda

Cusmaan Axmed Roble

Arkay Diiwaageli -

Diw. lamba. 20, Xaashi lamba. 96.

Hantidhowraha: Spadaro